



ismaamulka san diego



waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtaada si

loo ilaaliyo
marinadeena biyaha



20DISEEMBAR2016

BMP - yada yaraynta xawliga biyaha

Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **kahortaga maadooyinka wasaqda ah** sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnda biyaha daadka roobka kadibna galaaya balida, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.

BMP-yadu Waxay Nadiifiyaan Marinnda Biyaheena

BMP-yadaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya ee suuragalka ah. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **samayso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.


Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan **BMP-ka yaraynta xawliga biyaha ee dhismahaaga**. Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamija Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayo.




Sida BMP-kaaga Yaraynta Xawliga Biyaha uu U shageeyo

BMP-yada yaraynta xawliga biyaha ayaa ka hortaga daadadka ayagoo si ku meel gaar ah u kala horaaya daadka maraaya dhismahaaga kahor intuusan gelin nidaamka biyaha Daadka Qaada ee maxaliga ah. Inkastoo daadka xawligiisa la dhibay uu ku jiro BMP-gaaga, waxyaabaha wasaqda ah ee gudaha meesha ayaa fariisanaaya aliga, kadibna biyaha soo hara ayaa si tartiib ah loogu shubaa nidaamka daadka. BMP-yada yaraynta xawliga biyaha ayaa ah aagaga kala hooseeya halkaasoo biyaha daadka ay harsadaan muddo, ayna cadiyan qalalaan marka laga reebo xiliyada roobka badan jiro.

xog dheeraad ah >>>



ismaamulka san diego



waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtaada si
loo ilaaliyo
marinadeena biyaha



20DISEEMBAR2016

BMP-yada yaraynta xawliga biyaha

Hel oo Hayso BMP-gaaga



Si aad u hesho BMP-gaaga yaraynta xawliga biyaha, raadi aagaga godan ee biyuhu ku aruuraan kadib roobka. Waxaa jiri kara duleelka biyaha daadka oo ku yaala dhexda aaga ayadoo ku xiran nooca godka biyo qabadka ee aad haysato.

Marka aad hesho BMP-gaaga yaraynta xawliga biyaha, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta BMP-ga yaraynta xawliga biyaha xaalad shaqaynaya ayaa kaa caawinaya inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:

- **Ka bixi qashin kasta ama wasaqda ku aruurta warta, ama aagaga u dhowdhow marinnda iyo duleellada biyaha.**
- **Jar geedaha sida xad dhaafka ah u baxa kahor xili roobaadka (Oktoobar 1 deeda ilaa Abril 30 keeda).**
- **Buuxi duleellada ay biyuhu fariisan karaan wax ka badan 96 saacadood (tani waxay yaraynaysaa in kaneeco ka dhalato).**
- **Dayactir meelaha ciidu ka nabaad guurtay iyo dagaandegyada.**
- **Ha xanibin meelaha horay u furnaa ama haka leexin biyaha BMP-ga.**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

Sanad kasta Barnaamijka Difaacaha Waraha Biyaha ayaa kuusoo diraaya foomka xaqijinta dayactirka si aad u buuxiso, u saxiixdo, aadna ugu celiso Ismaamulka. Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in la xaqijiyo in dayactirka muhiimka ah lagu sameeyay BMP-gaaga.

Ku fashilmida samaynta dayactirka BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah.



Haddii aad qabto su'aalo, Nagalasoo Xariir:
Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha

1-858-495-5323

BMP.Program@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater